

**baaq kasoo baxay kulan-cilmiveedkii 12aad ee lagu qabtay magaalada boosaaso:**

Ilaah ayaa mahadi u sugnaatay Nabigeena Muxamed Naxariis iyo Nabadgelyo korkiisa ha ahaato, intaas kadib waxaa Magaalada Boosaaso lagu qabtay kulancilmiyed ay kasoo qayb galeen Culimo ka kala socotay Degaannada Puntland, kaasoo looga hadlaayey Camalada qalbiga, socdayna mudo shan Maalmood ah,

Kulankaas oo Culimadu kusoo bandhigeen duruus kala duwan oo ay kafaa,iidaysteen qaybaha kala duwan ee Bulshada,duruustaas oo lagu qabtay xarumaha kala ah:  
Jaamacadda Bariga Afrika, iskuullada Machadyada, Xarunta Dawlada Hoose, Rugta Ganacsiga, iyo masjidka wayn ee Al-Rawda.

Waxaa xusid mudan in duruusta Masjidka Rawda lagala socday gudaha iyo dibadda dalka. duruustaas oo tiradoodu dhamayd ilaa 32 darsi,waxaa garab socday Jawaabo lagu dawaynayey su,aalihi Bulshadu u soo gudbisay culimada.

Gunaanadkii kulan Cilmiyedka ayaa Culimadu waxay kasoo saareen Baaqan soo socda:

**Bulshada guud**

1. Waxaan ugu baaqaynaa dhammaan umadda Soomaaliyeed alle kacabsi iyo inay qabsadaan kuna dhaqmaan Kitaabka iyo sunnada Nabiga ( nabadgelyo iyo naxariis korkiisa ha ahaato)
2. Waxaan ugu baaqaynaa umadda Soomaaliyeed walaalnimo, heshiis, is cafin,iyo in ay ilaaliyaan midnimadooda
3. Waxaan ugu baaqaynaa bulshada inay ka fogaadaan dhaqamada xun-xun ee dhaawacaya diinteenaa, sida: sixun u adeegsiga internetka, qaawanaanta, filimadaxun, heesaha, daroogada, oo uu ugu daranyahay qaadku,
4. Waxaan ugu baaqaynaa bulshada gaar,ahaan dhalinyarada wiilal iyo gabdhaha inay kawaan toobaan tahriibta taasoo ay kala kulmaan dhibaatooyin W/weyn oo ay ka mid yihii dhaqaale burbur, xarig, kufsi, dhimasho, iyo qoysaskii ay kadhasheen oo burbura, ogaadaana qofka qatartaas u bareera in uu lamid yahay qof naftiisa dilay sharci ahaanna aanay bannaanayn.
5. Bulshada Soomaaliyeed waa inay ka digtoonaadaan hindi-sayaasha ay wataan hay,adaha gaaladu ee khilaafsan diinteenaa, taasoo ay hada ugu darantahay dagaalka qaawan ee lagu diidanyahay gudniinka gabdhaha ee Sharciga ah, iyadoo diinteenuu amartay in la gudo rag iyo dumarba, waxaase xusid mudan in uu xaaraam yahay gudniinkii loo isticmaali jiray gabdhaha ee loo yaqaanay fircooniqa, hadaba culimadu waxay fatwo kusoo saareen in gudniinka gabdhaha ee sharciga ah uu yahay shay diin ah oo aan sinaba looga tegi Karin.

## **Sivaasada**

6. Waxaan ugu baaqaynaa siyaasiyiinta soomaaliyeed in ay kashaqeeyaan danaha dalka, dadka iyo diinta, kana fogaadaan wax yaabaha iska horkeeni kara ummadda Soomaaliyeed, lana yimaadaan maamul wanaag iyo hufnaan
7. Dawaladda fedraalka waxaan ugu baaqaynaa in ay sidegdeg ah ugu hawlgasho daryeelida qaxootiga Soomaaliyeed ee ku firirsan daafaha dunida iyo dalkaba gaar ahaan kuwa hadda dhibaatadu ku haysato dalka keenya.
8. Culimadu waxay si adag u canbaaraynaysaa hab dhaqanka dawladda keenya ay kula kacday Bulshada Soomaaliyeed ee martida u ah xiligaan danbe,
9. Maamulada Soomaalida : waa inay daryeelaan dadka iyo Gobolada ay xukumaan islamarkaasna kafogaadaan wixii keeni kara dhiig Soomaaliyeed oo daata,

## **Hogaanka dhaqanka :**

10. Waxaan ugu baaqaynaa isimada, nabadoonada iyo Cuqaasha, in ay u weel qaadaan dib u heshiisiinta, kala guridda, iyo nabadaynta beelaha soomaaliyeed ee ay hogaanka u yihii, beeluhuna waa inay la yimaadaan isu turid, dulqaad, is cafin, iyo isu calool xaarnaan.

## **Haweenka:**

11. Haweenka Soomaaliyeed waxay leeyihiin mudnaan wayn maadaama ay yihii hooyoojinkii ummadda, sidaa darteed waa in ay gartaan kaalin tooda ay siisay shareecadu kana fogaadaan dabinada lagu majara hababinayo waxna loogu dhimayo sharaftooda iyo maamuus kooda, ogaadaanna in ay siisay shareecadu xuquuq dooda oo dhamaystiran

## **Culimada iyo aqoon yahanka :**

12. Waxaan ugu baaqaynaa Culimada iyo aqoon yahanka Soomaaliyeed inay ku beeg toonaadaan kaalinta ay ku leeyihiin bulshada, ee ah toosinta dhaqankooda iyo tayaynta tacliintooda kana wacyi geliyan wixii dhaawacaya quluubtooda, Akhlaaqdooda iyo dhaqan kooda suuban.

### **Mahadnaq :**

Waxaan umahad naqaynaa mu, asasadii soo abaabushay kulan cilmiyeedkaan ee Alminhaaj, iyo dhammaan gudiyada kashaqay naayey, waxaan kale oo u mahad naqaynaa bahda saxaafadda qaybaheeda kala duwan sida: tvyada, idaacadaha, mareegaha ka qayb qaatay baahinta iyo tebinta kulan cilmiyeedka, waxaan kale oo u mahad naqaynaa dhamaan dhinacyadii kaqayb qaatay taaba gelinta iyo qabsoomida kulan cilmiyeedka.

### **Gunaanad :**

Culimadu waxay eebe uga baryayaan umada Soomaaliyeed in alle waafajiyoo kutoosnaanta diintooda, ilaalinta midnimadooda, iyo xoojinta walaal nimadooda

### **Culumada Baaqa soosaaray**

1. Shiikh Daahir Aw Cabdi
2. Shiikh Maxamuud Xaaji Yuusuf
3. Shiikh Maxamuud Maxamed Xalliike
4. Shiikh C/raxmaan Maxamed Dhowre (Bukhaari)
5. Shiikh Fu,aad Maxamuud Xaaji Nuur
6. Shiikh Xasan Xuseen Axmed
7. Shiikh Faarax Maxamed Cajab
8. Shiikh Axmed Maxamed Siciid
9. Shiikh Yuusuf C/casiis Maxamed